# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

**Opened: - 10:11 AM** **Hansard No.21/3** **Kal-fadhiga 21aad fadhigii 5aad**

***30/04/2013***

**Md. Baashe Maxamed Faarax Gudoomiyaha:-** *Waxaa Fadhigan inoo Marti ah Gudoomiyaha Baanka Dhexe, si ay Warbixin inooga siiiyaan hawlaha ay Qaranka u hayaan Su'aalana uga weydiino, Marka hore Gudoomiyaha ayaan ku soo dhoweynayaa.*

### Md. Gudoomiyaha Baanka Dhexe ee Jamhuuriyada Somaliland

***15 minute and 41 Sec***. Mudanayaasha iyo saxaafadaba waad salaaman tihiin, waxaan ka hadlayaa arimihii waa waynaa ee sadexdii bilood ee ugu dan bee yay aaanu galanay iyo wixii nooga qabsoomay. Arinta ugu horaysa sadexda bilood ee ugu danbeeyay waxaanu la lagdamaynay sidii sixir-bararkii ka yimiday doolarka oo sare u cay waayo waxaa uu gaadhay **7200Sh/L** halka uu saaka ka marayo **6700 sh/L** waanad arki kartaan is badalka aan ka samaynay arintaa joojina mayno ilaa uu gaadho sixir munaasiba.

Doolarku sanadihii hore waxaa uu dhici jiray wakhtiyada aan xoolaha dhoofinayno sanadahan waxbaa iska badalay oo xoolihii aan dhoofin jirtanay sidii hore may ahayn oo dadka xoolaha iibsadaa waxay sanadkan ka soo iib sadeen kilidhka shanaad (Ethiopia) iyo Somalia oo doolarkii waxaa uu u wareegay koonfurta iyo kilidhka shanaad oo wakhtiyadaa doolarku waxa uu gaadhi jiray ilaa **6500 Sh/L,** sanadka laga bilaabo wakhtigii xoolaha la dirayay wuxuu gaadhay **6500Sh/L** intaa ka dib doolarku hoosba uma soo dhicin taas oo ay keentay aswaaqdeena oo dolarku ku yaraaday iyo lacagtii oo ina dhaaftay.

Waxaanu la kulanay Telsom oo aanu kala hadalnay arrinka Zaadka waayo arintan ay wadaan waa electronic banking taas oo ay ka dhalatay farsama xumadii maaliyada sharcigaasina aanu soconaynin oo zaadu aan rajaynayno in uuna hoos iman exchange oo aanu socon doonin hadii aanay telsom talaabo qaadin oo anay samayn bank ay zaadu hoos timaado waayo zaadu waaa electronic bark, lacago badan oo dibadaha inaga soo gasha oo ay soo diraan dadkeena qurba-jooga ah iyana waxaanu rabnaa in ay ku dhex wareegaalaysato xisaabaha uu Zaadku leeyahay taas oo keenta in lacag badan

oo doolar  ah in accountiska is wadaartaan, taas oo aanu aamin sanahay in ay wax yeeli karto doolarka suuqa soo gali lahaa.

Waxaanan ku nidhi arintaasi waxaanu idinka yeelayno mahaan waaayo waxaanu rabnaa in aad hore u soo kacdaan oo aad keentaan bank uu zaadku hoosyimaado oo electronic bank uu ka mid noqdo taasna waa ay naga yeleen oo waxay noo sheegeen in aan bank samayn doonaan oo ay application kana waanu ka sugaynaa taasi waan isla garanay, takale waxaanu u sheegnay in arinkan Zaadka wax ka qabtaan oo ay lacagta dollarka ah ay ka badalaan oo ay Somaliland shilin ka dhigaan, waaxanay noo sheegeen in ay wax ka badalayaan system kooda.

Markaan ka gudbo labadaa arimood anagu hada waxaan rabnaa in aan furno commercial banks maadaama anay jirin dad khibrad u leh commercial banks waxaanu la hadalnay world bank ka waxaananu ka codsanay in ay dad noo train gareeyaan oo khibrad iyo skill yeelan kara oo aanu ran garany karno baanaka waanay naga aqbaleen waxaany noo soo direen laba consultant oo dadka noo tarin gareeya waxaanu galinay wax la yidhaa  accelerating pray training dhekhso u socda ayaanu galinay inta badana waa ay noo dhamaadeen wax yaabahaasi oo dhami waayo hada waxaan maraynaa lugtii ugu danbay say oo ah in ay qaadaan dadka oo ay geeyaan central bank oo ay shaqaaluhu soo arkaan sida practical ka ah ee loo shaqaynayo ama ay u sheqeeyaan baananku waxaanay noo balan qaadeen in ay imika qaadayaan oo ay gaynayaaan central banka Kenya iyo Malaysia oo ay ka soo khirad qaadanayaan sida real life ka ay u shaqeeyaan.Markaa waxaan ku jirnay hawlahaa waxaanan rajaynaynaa in uu traininkii uu mudo laba ama sedex weeg ah uu noo soo xidhmo waxaanan diyaar unahay in aanu maamulno baanaka ganacsiga ahayd.

Waxaa kale oo naau dardar galinay sidii loo furilahaa commercial banks ka waxaanu lahadalnay agency ga Somaliland jooga waraaqona waanu u qornay waxanan u sheegnay in hada wixii ka danbeeya aanu aqbali doonin wixii sharciga ka baxsan anay dhamaatay wakhtigii laga faa'iidaysanay sharcidarada Maaliya iyo lacagahaasuna ay dhamaadeen, waxaa jira dad lacago fiican haysta oo u gudbi kara bank oo aanu ku nidhi wixii aad ka faa iidaysan karteen waad ka faa'iidaysateen lakiin waxkhtigan wixii ka dan beeya waan joojinaynaa oo arintaasi wax soconaysa  mahaan oo waxaa la samaynayaa commercial banks arinkaana waa ay naga yeeleen.

Barigii hore exchange waxaanu siin jirnay shahaadooyin wax badan ku maanaan xidhi jirin hada se waxaanu u samaynay shuruudo ilaa sideeda oo

aan la aantood la siin Karin liisan, waxaa kale oo aan ogaysiinay in hada laga bilaabo sharcigii la hore mariyay oo ay tahay in lagu dhaqmo.

Dhawaan waxaanu yeelanay shir sedex geesood ah oo aan wada yeelanay anaga , Wasaarada Maaliyada iyo Gudidda Dhaqaalaha Baarlamaanka arinta waxaa ay noo fadhiday oo aanu soo proposal garaynay sidii xal loogu helilahaa dollarku marka uu kaco iyo marka uu hoos udhaco, baan ahaan waxaan soo propose garaynay waar bal aan wakhti cayiman aan xidhno dollar rate ka oo aan eegno mudo anan ka dhigno 6200 -6400 sh/L oo aan eegno sida uu u shaqeeyo. Waayo aduunyaduba way fix gareeyaan doolanrka mar kaay dhacdo sidani inana ku waas  ayaan ka midnahay arintaasina way socotaa qaraar aan wali kagaadhnayna wali ma jirto proposal kiina sidaa ayuu wali naga maqanyahay, inkasta oo ay jirto woxogaa cabsiya waayo waxaan nahay free market hadana waa in ka fix gareeyaa rate ka waxaa kale oo jirta in aan wax ka qabano wax la yidhaa suuqa madaw (black market) oo dadka samaynaya lacaga foojariga ah in aan wax ka qabano loo baahan yahay arintaasina waan sii wadaynaa ee maahan mid aan ka hadhayno.

Hada waxaa la approve gareeya qayb baanka ka mid ahoo supervise garaysa maadaama aanay jirin markii hore waxaan horkeenay boardka iyo habaka loo samaysanayo waanay approve gareeyeen.

Lacagta Somaliland wali may gaadhin SOOL iyo SANAAG iyadana waxaan ku talo jirnaaa in aan gaadh siino gonboladaa lacagta Somaliland, waayo maalmahan waa ka ururiayay lactii shilnka ahay markaa hadii lagu bilaabo way sii yaraanay saa ee waxaa qorshaha noogu jira in marka uu doolarku naga yara dago aan bilawno oo aan waliba ku bilawno Sanaag. Waxaan rajaynayanaa in Allen ala garab qabto waayo tii horaba geesinimo ayuun baan ku bilaw nay Allana waa uu nala garab qabtay dardar galinteedana waan ku jirnaa mida kalana baananka ganacsigana waan ku dadaalaynaa sidii ay u hir gali lahaayeen waxaanan rajaynaynaa in Sedexda bilood ee soo socda aan ka midho dhailn doono aritaan waanad mahad san tihiin.

**1. Md. Maxamuud Jaamac Cilmi (Dable)**

**Su'aal:-** Mudane gudoomiye duruufo aydaan qaadi Karin ayaa idin hortaagan waan ognahay wadan ku hadaanu lahay wax adag oo uu soo raaro oo uu ku qariyo doolarka waa dhibaato markaa su'aasha aan ku way diinayaa waxay tahay wadan ka waxaa jira shiriikaad tilidoon oo wadan ka shaqaysta ama dhulka hayaaleen ama jeebka ha lagu sitee mid ruqsad haysta in la soo dajiyo malahan halkaa lacag la'aanta mid ayay katahay.

**Su'aal:-** Zaadka markii hore waxay ahayd in ruqsad la siiyee markii hore miyaad siiseen? Zaadkaa wax cashuur ah miyaad ka qaadataan Zaadkaa wareegaya ee lacagtii baanka la dhigan lahaa? Mida kale hadii aad lacagta xakamaysaan (Black Market) ayuu galayaaye waxaan qabaa in lagu daayo halkaa oo aan ka warhaysaan aanad maamushaan?

**Su'aal:-** Lacagaha xawaalaha shilin cashuur ah kama qaado Wasaaradda maaliyada, Dawlada iyo idinkuba markaa halkaa miyayna idiinka banaanayn in halkaa shilimaad?

**Gudoomiyaha Baanka.**

**Jawaab:-** Mudane mida aad ka hadashay ee ah tilfoonada jeebadaha lagu sito taasi anaga maahan ee waxay khusaysaa Wasaarada Boosaha iyo isgaadh siinta waxaan filayaa in aad u jeedo zaada waanu ognahay waanu aamin sanahay in lacag badan ay gacmaha siu waydaarsadaan oo suuqa soo gali lahayd waanan kala hadal nay taas wananu is la qabalnay Zaaduna in ay sidaa u shaqayso waxaa laga faaiidaystay sharci la aanta ee maanta laga bilaabo waxaan yeelayno maahan ee waa in ay hoostimadaa bank waxanan ka la hadal nay in loo badalo Somaliland shilin taasna way naga aqbaleen.

**Md. Cali-Mareexan sixitaan:-** waxaan saxayaa, Marka aynu ka hadlayno dhaqaalaha waa wax loo bahanyahay Zaad ha ahaato ama Xawaalad ahaato, laakiin Magaca shirkadaha aynu iska deeyno ma fiicna sida telesom in la magacaabo.

**Gudoomiyaha Baanka Jawaab:-** su'aasha labaad ee Sariflayaasha

**2. Md. Faarax Maxamuud Cabdule:-**

**Su'aal:-** arrinta Zaadka oo su'aasha horena ku jirtey sida dastuurku dhigayo dawlada yaa uga masuula dadweynaha hantidooda, lacagta Zaad dadka lacagta dhiganaya madaaama aydaan ruqsad siin, Markaa hantida yaa uga Masuul?

**Su'aal:-** Gobolada bari ee  SOOL iyo SANAAG waxaad sheegtey inan lacagta la gaadhsiin maxaa hortaagan inaad lacagta gaadhsiisaan?

**Gudoomiyaha Baanka.**

**Jawaab:-**  Mudane Zaad waxay ku sameysatay oo ka faa'ideysatay sharci-darada Wadanka ka jirtey, iminkana may imane wadanka mudo badan nay ka jirtey, dabcan anagu waanu siiney lisence oo hore wuu u jirey liisan la siiay

anaguna waan u jadiidiney laakiin shuruuduhii aanu dooneynay way ka soo bixiweyday, markaa fariin baanu u dirney oo u yeedhnay markey noo yimaadeen waxaanu nidhi waxaad warbixin naga siisaan siduu u shaqeeyo Zaadku iyo dadka lacagta dhiganaya ee aanu masuulka ka nahay lacagtooud u lumin, warkay nagu soo celiyeen muu noqon midaan ku kaaftooney, iminka arrimuhu way isbadaleen oo sharcigii waad ansixiseen, iyana sidaad maqleysay waxay isu badalayaan Bank sidii hore u soconmayso oo waxay hoos imanaysaa Baanka dhexe, Markaa arrintaasi si dhakhso ah u soo afgo'aysa ayay noqoneysaa.

Jawaab:- arrinta Lacagta Gobolada barri gaadhsiinteeda, waxaa jira duruufo aan noo saamixin inaan gaadhsiino, laakiin iminka markii aan isla eegnay hay'adaha Wasaarada Maaliyadu ka mid tahay waxay iila eegtay wakhtigii la gaadhsiin lahaa Lacagta Gobolada SOOL iyo SANAAG oo iminka Gaadhsiinayno.

**3. Md. Xasan Cawaale Caynaan:-**

**Su'aal:-** Markaad Baanka gashid waxaad arkeysaa Sariflayaal farabadan, isla markaana mararka qaar la baxaya lacag aad u badan, markaa ma idinka u sarifa, ma dadkey ka sariftaa, ma Lacagta faraha badan baa keynaysa Sicir bararka, Xidhiidhse ma leedihiin Sariflayaasha, Mar hadayse Baanka ku sarifayaan idinku maxaad dadka ugu sarifiweydeen?

**Su'aal:-** lacagtii 5000 aad bay u soo yaraaneysaa, isla markaana waxay noqotey mid aad u jilicsan oo israac raaceysa, Markaa maxaa idiinka yaal lacagtaasi inaanay suuqa ka bixin?

**Gudoomiyaha Baanka.**

**Jawaab:-** Sariflayaasha lacagta la baxaya, Sariflayaashu waxay ka mid yihiin Customerska baanka, hadii lacag u taal wuu la bixikaraan hadaad aragtey iyagoo lacag kala baxaya baanka, anaguna ma badalo lacagta oo waxaanu ku shaqeynaa Somaliland shilling oo dollarka ma sarifno oo exchange ma sameyno.

**4. Md. C/raxman Yusuf Cartan:-**

**Su'aal:-** Horta baankeenu siduu u shaqeyn jirey waa treasure oo lacagta dawladu dhigato ayuu ka shaqeyaa maamulkeeda, Financial institutionkuna waa meelaha laga macaasho oo lacagta laga helo, waxaa ka markhaati ah waxaa xawaalada sameysmay Lacag bay ka shaqeeyaan oo service sameyaan

ay Macaash badan ka helaan, ma idiin qorsheysan tahay inaad sameysaan servicekaa Baanku ku macaashayo sida financial institution?

**Su'aal:-** waxaa jira NGOs, Hay'addo dawlada si toosa ula macaamila oo dadka lacag qalaad soo galiya oo mashaariic Somaliland ka socota maamula, Baanku wuxuu jirey 21 sano ku dhawaade, maxaa idiin diidaya waxaa jira lacag xumaateye inay Baanka lacag dhigtaan hay'addaha Qaramada Midoogey iyo kuwa kale caalamiga ahi oo sidaad dawlada ugu shaqeysaan ugu shaqeysaan, waxaa lagayaabaa inaad ka service wanaagsanaataan Xawaaladaha ay iminka dhigtaan?

**Gudoomiyaha Baanka**

**Jawaab:-** Marka ugu horeysa central bank wuxuu taaba qaadayaa marka commercial banks ay sameysmaan, markaas buu wuxuu noqonayaa baanka dhexe mid shaqeynaya oo ku shaqeynaya shuruucdii loo ansixiyay, wali waxaanu haynaa inaan lacagta dawlada maamulno oo wadno.

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada**
----------------------------------------------

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl**
----------------------------------------------